

Talo wanaagsan oo ku saabsan qaylo dhaamiyeyasha qiiqa ee guriga lagu rakibto



Qaylo dhaamiyaha qiiqu waa hab qaali ah ee caymiska nolosha maadaama uu jawaab ka bixiyo qiiqa halista ah oo uu digniin soo diro.

Immisa qaylo dhaamiye qiiq ayaad u baahan tahay?

- Waa in aad haysataa hal qaylo dhaamiye qiiq oo kuugu rakiban dabaq kasta oo gurigaaga ka mid ah.
- Qaylo dhaamiye kasta ee qiiq waa in uu lahaadaa dhul uu wax ka dareemi karo oo ugu badnaan la eg 60 m² isla markaana masaafada u dhexeysa labadii qaylo dhaamiye waa in aysan ka badnaan 12 mitir.
- Qaylo dhaamiyeyasha qiiqa waa in lagu xiraa meel u dhow qolalka jiiifka. Xusuusnow in albaabada xiran iyo buuqa faraha badan ay wax aan suuralgal ahayn ka dhigaan in qol kasta oo jiiif laga maqlo qaylo dhaamiyaha qiiqa.
- Hubi baakada ay ku jiraan si aad u xaqiijisid in qaylo dhaamiyaha qiiqu uu leeyahay waxyaabaha looga baahan yahay heerka ku saleynta ee SS-EN 14604. Waa marka aad hurdeyso marka aad ugu nugushahay qiiqa iyo dabka!

Xaggee qaylo dhaamiyeyasha qiiqa lagu rakibayaa?

- Tilmaamaha bixiyaha qaylo dhaamiyaha ayaa ku siin doona macluumaadka meesha ay tahay qaylo dhaamiyaha qiiqa lagu rakibo, laakiin guud ahaan arrimaha soo socda ayaa ku dabbaqma:
- Qaylo dhaamiyeyasha qiiqa waa in lagu rakibaa meesha ugu sarreysa qolka waxaana la doorbidaa bartamaha qolka.
 - Haddii gurigaagu uu leeyahay in ka badan hal maqaasiin qaylo dhaamiyaha qiiqa waa in lagu rakibaa meesha ay jaranjaradu dabaqa kale ka gasho.
 - Qaylo dhaamiyeyasha qiiqa waa in lagu rakibaa saqafka, ee yaan lagu rakibin derbiga.
 - Qaylo dhaamiyeyasha qiiqa waa in lagu rakibaa ugu yaraan meel 50 cm u jirta shayga kale.
 - Qaylo dhaamiyeyasha qiiqa waa in aan lagu rakibin meel u dhow daloollada hawadu ka soo gasho.

- Qaylo dhaamiyeyasha qiiqa waa in aan lagu rakibin meel u dhow cunto kariyeyasha ama musqulaha, garaashyada ama qolalka balwadda lagu isticmaalo halkaasoo laga yaabo in ay qaylodhaan been ah oo dadka dhibta ka sameeyaan.

Ha illoobin in aad tijaabiso qaylo dhaamiyeyasha qiiqa markaad rakibato ka dib!

Dayactiridda

- Nadiifi dibedda qaylo dhaamiyaha qiiqa adigoo isticmaalaya nadiifiyaha qashinka dhuuqa (vacuum cleaner) sanadkiiba hal mar.
- Waxaan dadka faraynaa batariyada lithium maadaama ay raagaan in shan goor ka badan batariyooyinka alkaline-ka ah ee caadiga ah aysan u baahneyn in la beddelo sanad kasta. Haddii ay dhacdo in aad go'aansato in aad isticmaasho batariyada alkaline-ka

markaas xusuusnow in aad sanad walba beddesho (tusaale ahaan billowga Disembar).

- Tijaabi qaylo dhaamiyayaasha qiiqa saddexdii biloodba mar ama marka aad guriga ka maqnayd muddo dheer.
- Beddel qaylo dhaamiyayaasha qiiqa 8–10 sanadoodba mar maadaama ay leeyihiin jiritaan wax ku ool ah oo xaddidan.

Tijaabinta qaylo dhaamiyaha qiiqa

Qaylo dhaamiyaha qiiqa waxaa la tijaabin karaa iyadoo la riixayo badhan ama shumac markaas la demiyey hoosta lagaga qabto.

Xaggee ayaad ku tuureysaa qaylo dhaamiyayaasha qiiqa?

Qaylo dhaamiyayaasha qiiqa waxay ka tirsan yihiin qaybta waxyaabaha ay tahay in qashinka elektaroonigga lagula tuuro xaunta qashinka dib loo isticmaalo. Batariyooyinka ka saar oo meel gaar ah dhig. Waxaad sidoo kale qaylo dhaamiyaha qiiqa ku soo celin kartaa ciddii aad ka iibsatay marka aad mid cusub soo iibsaneysid.

Gurigaaga ka difaac dabka

Iyadoo sii dheer qaylo dhaamiyayaasha qiiqa waxaan sidoo kale ku talineynaa in aad gurigaaga si guud dabka ugaga difaacdid Brandsäkert hem®. Lix tallaabo ayaa ah waxa loo baahan yahay:

- Hab dabka dareema oo la isku halleyn karo
- Dab demiyaha budada ah 6 kg, heerka 43A 233BC
- Buste dab, cabbirka 120 x 180 cm
- Dusha ka ilaalin cunto kariyaha ootomaatigga ah
- Gal ay ku qoran yihiin macluumaadka dadka guriga deggan
- Maaddo tababar. Waxaad wax badan oo ku saabsan tallaabooyinka kala duwan ka akhrisan kartaa www.brandskakterhem.se.

MAR KASTA WAC I12 HADDII UU DAB KU QABSADO

Ururka Ka Hortagga Dabka ee Swedish-ku waa xubin ururro badan oo ka shaqeeya in ay Sweden ka dhigaan meel ammaan ah. Iyadoo loo marayo macluumaad bixin iyo tababar ayaan dadka, shirkadaha iyo ururrada ka caawinnaa iyo mas'uuliyad iska saaraan ka hortagga dabka. 08-588 474 00. www.brandskyddsforeningen.se